MANHAJONLINE.COM

هزيمة الفكر الإلحادي

JABKA ARAGTIDA ALLE-KOODNIMADA

فَضِيلَةُ الشَّيْخِ عَبْدُ الْكَرِيمِ حَسَنْ حُوشْ



DIYAARIYE: AXMED KHAYRE

MANHAJ ONLINE

Nuxurka Muxaadarada

هزيمة الفكر الإلحادي

Jabinta Aragtida Alle-Koodka

Diyaariye: Axmed Daahir Cali (Axmed Khayr)

WhatsApp: http://wa.me/252634343306
Telegram: https://t.me/jannadoone
Facebook: https://www.facebook.com/axmedburcawi

TUSMO

TUSMO 3
Ilaahay isaga ayaa wax walba abuuray: 5
Qaacidada (السّببيّة) loo yaqaanno: 5
Falaasifadii hore qaarkood, Caalamku waa qadiim ayay qabeen: 6
Makhluuqaatka aan bar dhammaadka lahayn: 7
Qaacidada (السّببيّة) yaa iktishaafay? Mase la isla oggol yahay? 7
Reer miyi maskax badan: 7
Abuu xaniifa (Ahun) iyo Alle-kood: 8
Maxaad ku aqoonsatay Rabbigaa? 9
Duccooyin intee le'eg ayaa Nabiga (ANKH) laga aqbalay? 9
Aabbo iyo Hooyo waxba ma abuuraan ee waa sabab uun: 9
Ku qosol Caqliga Alle-koodka: 10
Awood ka sarraysa Banii-aadanka ayaa jirta: 10
Makhluuqaatku qaabkii ugu wacnayd ayay ku suggan yihiin: 11
Daliilka Tamaanuca loo yaqaanno: 11
Alle-koodku waxyaabo "Qayb" ah ayay rumeeyaan: 11
Alle-koodku waa Ilma Daanyeer: 12
Qaacido muhiim ah: 13
Waddooyinka wax lagu garto Alle-koodka agtooda: 14
Dooddii Sumaniyada iyo Jahm binu Safwaan: 14
Waxyaabo la rumaysan yahay, Dareemayaashana aan lagu oggaan: 15
Tafsiirka "Ruuxda" waxa ku suggan 1800 oo qawl: 15
Caqligu Maskaxda maaha: 16
Cuf-sijiidadka & Maayadda Laydhka: 16
Alle-koodka kale: Dareemayaasha & Caqliga ayaa wax lagu gartaa: 17
Araggu waa Dareemayasha ka ugu xoogga badan: 17
Araggu mararka qaar waa gafaa: 18
Caqliyadii way is khilaafayaan, wayna kala duwan yihiin: 19
Waa maxay Waddooyinka wax lagu gartaa? 19
Alle-koodku Warar badan ayay rumeeyaan: 20
Wajiyada ka suuraggalka ah Makhluuqaatka abuuristooda: 21
Dabeecaddu waa maxay? Miyay wax abuuri kartaa? 22
Qawaaniin & Xeerar wax abuuraa ma jiraan: 22

Indha-adkaanta & Madax adayga Alle-koodka: 22
Qalbiga Alle-koodku waa Bakeeri foorara oo kale: 23
Xaalka Alle-koodka marka Geeridu ku soo xaadirto: 23
Waa maxay العلل الأربعة**?** 24
Alle-koodku waa laba qaybood: 26
Qaabka loola doodayo Mulxidka Salbiga ah: 26
Qaabka loola doodayo Mulxidka Iijaabiga ah: 27
Gaaladu aad ayay u faafiyaan Alle-koodka: 28
Alle-koodka & Akhlaaqdii: 28
Talo & Gunaanad: 29

Ilaahay isaga ayaa wax walba abuuray:

Ilaahay (سبحانه وتعالى) isaga ayaa abuuray Innaga iyo Dhammaan Makhluuqaatka, Allaah waxa uu yidhi:

"Allaah ayaa wax kasta oo Makhluuq ah abuuray" ﴿ٱللَّهُ خَٰلِقُ كُلِّ شَيۡءٖۖ ٦٢﴾[1]

"Wuu abuuray Allaah wax kasta oo makhluuq ah" ﴿وَخَلَقَ كُلَّ شَيۡءٖ ٢﴾[2]

"Ma Abuure aan Allaah ahayn ayaa jira?" Yacnii ma jiro. ﴿هَلۡ مِنۡ خَٰلِقٍ غَيۡرُ ٱللَّهِ ٣﴾[3]

Waxa ay leedahay Jirsiinta uu Allaah (سبحانه وتعالى) Makhluuqaatka jirsiiyay Daliilo iyo Caddaymo Caqli ah, oo Caqliga lagu aqoonsaday, iyo Caddaymo Samciga (waxyiga) lagu gartay, iyo Caddaymo Fidrada lagu gartay.
Marka uu Allaah yidhi:

﴿ٱلۡحَمۡدُ لِلَّهِ رَبِّ ٱلۡعَٰلَمِينَ ٢﴾[4]

Ereyga (العالمين) waxa weeye Wadarta Ereyga (العالم), Caalam-na waxa la yidhaahdaa wax kasta oo Allaah ka soo hadhay, waxa (Caalam) loo yidhi: Calaamad iyo Amaarad ayuu u yahay Allihii abuuray ee jirsiiyay.

وفي كلّ شيء له آية *** تدلّ على أنّه واحد

Qaacidada (السّببيّة) loo yaqaanno:

Shay kasta oo soo derriyay, waxa caqli ahaan la garanayaa in cid ay soo derrisiisay, ama waa Qaacidada loo yaqaanno (السّببيّة) Yacnii shay kasta oo soo derriyay waxa la garanayaa in uu leeyahay sabab.

"Shay kasta oo la soo derrisiiyay, waxa lagama maarmaan ah in Cid soo derrisiisay ay jirto" لكلّ محدَثٍ لا بدّ له من محدِث

---

1 الزمر: ٦٢
2 الفرقان: ٢
3 فاطر: ٣
4 الفاتحة: ٢

Ama

> **“Shay kasta oo soo derriyay, waxa lagama maarmaan ah Cid soo derrisiisay in ay jirto”** لكلّ حادثٍ لا بدّ له من محدِث

Falaasifadii hore qaarkood, Caalamku waa qadiim ayay qabeen:

Falaasifadii hore ee gaalada ahayd waxa la sheeggaa, in qaarkood ay odhan jireen; Caalamkani waligii wuu jiray oo waa qadiim aan bar bilow lahayn, laakiin taasi way beenowday oo gaaladii dambe xattaa way u caddaatay in ay Been tahay.
Waxa aynnu garanaynaa in Makhluuqaatkii innaga horreeyay aanay waligood jirin, sidaas oo kale waxa aynnu aragnaa makhluuqaat aan hore u jirin oo soo derriyaya dibna ka jiraya.
Waxa hadda Cilmi ahaan ama saynis ahaan la caddeeyay, in Qorraxdu ay mar walba wax kulkeeda ka mid ah bixinayso, markaas hadday waligeed qadiim ahayd Kulku waa taggi lahaa.

Haddaba weydiinta muhiimka ah waxa weeye, Makhluuqaatkani miyuu iska doo derriyay mise cid ayaa jirsiisay oo abuurtay?
Ogsoonnow horta oo Maanka ku hay, in aan la odhanayn shay kasta oo jira waxa lagama maarmaan ah in la jirsiiyay, ee waxa la odhanayaa (sida aan horeba Qaacido ahaan u sheegnay) Shay kasta oo soo derriyay ama la soo derrisiiyay, waxa lagama maarmaan ah in la soo derrisiiyay, waayo Allaah (سبحانه وتعالى) waxa u sugnaaday Jiritaan, Makhluuqana waxa u sugnaadday jiritaan, **Jiritaanka Allaah waa Mid aan Bar bilow lahayn, waana Mid aan bar dhammaad lahayn,** oo Allaah waa (أزلي) oo waligii waa jiray, waana (أبدي) oo waligii waa jirayaa, laakiin Makhluuqaatku (أبدي)-na maaha, (أزلي)-na maaha.

Makhluuqaatka aan bar dhammaadka lahayn:

Haa way jiraan Makhluuqaatka qaarkood oo aan bar dhammaad lahayn[1], laakiin Allaah ayaa ka yeellay kuwo Baaqi noqonaya waligood ee iyagu may kasban.

Qaacidada (السّببيّة) yaa iktishaafay? Mase la isla oggol yahay?

Qaacidadaa aan soo sheegnay ee la yidhaahdo (قاعدة السّببيّة) waa Qaacido Gaalo iyo Islaamba ay isla oggol yihiin, waayahan dambe waxa soo baxday, in la yidhaahdo Qaacidadaa waxa iktishaafay Gaal hebel, warkaasina sax maaha, ee Qaacidadu waa wax ay Dadka Caqliga leh oo dhan isla oggol yihiin.

Reer miyi maskax badan:

Ninkii Reer Miyiga ahaa markii lagu yidhi; Maxaad ilaahay ku aqoonsatay ama ku garatay? Waxa uu ku jawaabay:

"البعرة تدلّ على البعير، والأثر يدلّ على المسير، فسماءٌ ذاتُ أبراج، وبحرٌ ذاتُ أمواج، وأرضٌ ذاتُ فِجَاج، أفلا تدلّ على الصّانع الخبير"

"Saaladu waxa ay tusinaysaa Awrka, Raadkuna waxa uu ku tusinayaa Socodka, Cirkan Xiddigaha, Qorraxda iyo Dayaxa u saaxiibka ah, Baddan Mawjadaha leh, Dhulkan Waddooyinka leh miyaanay tusinayn Allaha abuuray ee aqoonta badan?"

Immika haddii Qof eegaya Dhulka Qof kale arko, dabeetana uu ku yidhaahdo; Maxaad ka eegaysaa Dhulka? Oo uu yidhaahdo: Raadkii Ri'dayda ayaa Meesha iiga muuqda, oo uu ku yidhaahdo; Raadkan Cidi may dhiggin'e, Isaga ayaa is dhigay!!!! Ama uu Qof yidhaahdo; Saaladan Neef ma dhiggin'e, Iyadaa is dhigtay!!! Miyaa laga rumaysan lahaa? Miyaanse la qoreen in uu Qof waalan oo Miyir la' yahay. Sidee haddaba ay u suurtoobaysaa in la yidhaahdo; Caalamkan

1 جعلها بعض العلماء ثمانية، ونظمها الحافظ السّيوطي بقوله:

ثمانية حكمٌ البقاء يعمّها *** من الخلق والباقون في حيّز العدم
هي العرش والكرسي نارٌ وجنّةٌ *** عَجْبٌ وأرواحٌ كذا اللّوح والقلم

weyn ee Cirka, Dhulka, Badaha, Buuraha iyo Xayawaanaatkaa badan ee kala duduwan ka kooban Cidi may jirsiin ee isaga ayaa is jirsiiyay! Waa wax aan suuraggal ahayn.

Abuu xaniifa (Ahun) iyo Alle-kood:

Waxa la soo raraa Imaamkii weynaa ee Abuu Xaniifa (Ahun) ayaa Qolo Alle-kood ah oo Dahriyiin ah ay ku yidhaahdeen; waanu kula doodaynaa! Markaas ayuu ku yidhi intaan dooddaba la galin: ka warrama, Haddii Qof uu yidhaahdo; Doonnidan Webiga Dijlah ku soo xidhatay ee buuxdaa iyada ayaa isa soo rartay, markii dambena iska rogtay, Qof shaqo ku darsadayna ma jiro! Haddii sidaa Qofi idinku odhan lahaa ma rumaysan lahaydeen? Markaas ayay yidhaahdeen; maaha suuraggal! Markaas ayuu yidhi: Doonni yar haddii aad ka diiddeen taas, Caalamkan oo dhan ayaa isagu is jirsiiyay iyada oo aan Cidi jirsiin, sidaad u rumaysateen oo u aqbasheen?! Waa Xujo iyo Garnaqsi caqli ah.

Waxa markaa lagama maarmaan ah Kawnkan iyo Caalamkan ballaadhan in uu jirsiiyay Alle Aqoon badan, Awood badan, kelina ah, waayo Kawnkan weyn ee uu sameeyay ayaa intaasba laga gartay, Maxaa yeellay haddii la arko Guri weyn oo fiilla ah aadna u qurux badan, waxa la garanayaa Engineer khabiir ku ah engineer-nimada in uu dhisay, suuraggalna maaha in la yidhaahdo; Nin Reer miyi ah oo aan waligii arag meel wax lagu dhisayo ayaa dhisay!!.

Maxaad ku aqoonsatay Rabbigaa?

Waxyaabaha Allaah lagu aqoonsanayo waxa ka mid ah, in uu ducooyinka iyo baryooyinka aqbalo, Sheekh Culamadii hore ka mid ahaa ayaa la weydiiyay

Maxaad Rabbigaa ku aqoonsatay? بم عرفتَ ربّك؟

Markaas ayuu yidhi:

Ducooyinka in uu aqbalo. بإجابة الدّعَوَات.

Duccooyin intee le'eg ayaa Nabiga (ANKH) laga aqbalay?

Culamada qaarkoodna waxa ay sheeggaan in Nabiga (ANKH) laga aqbalay 150 Duco in ka badan, oo markiiba la arkay.

Aabbo iyo Hooyo waxba ma abuuraan ee waa sabab uun:

Qaar Alle-koodka ka mid ah ayaa yidhaahda; Aabbahay iyo Hooyaday ayaa na abuuray! Taasina waa mid budlaankeedu iska cad yahay Maxaa yeelay Aabbo iyo Hooyo waa sabab uun, haddii Iyagu ay ku abuureen (Alle-koodoow!) iyagana yaa abuuray? Haddii aad tidhaahdo; iyagana Aabbahood iyo Hooyadood ayaa abuuray! Kuwii iyaga dhalayna yaa abuuray… Aabbihii ugu horreeyay yaa abuuray?
Sidaas oo kale Aabbo iyo Hooyo iyaga oo aan ogayn in uu Caloosha Ilme galay ayuu galayaa, qaar badani mabay rabin in uu Caloosha ilme galo, sida kuwa Xaaraanta isugu tagga oo kale, waxa ay rabaan kaliya in ay shahwada gutaan.

Waxa dhacay Oday ka mid ah Gaaladii Carbeed ayay Inani (Gabadhi) u dhalatay, markaas ayuu Gabadhiisii (Xaaskiisii) ka soo agwareeggi waayay, markaas ayay Gabadhiisii geeraartay, ayna tidhi:

ما لأبي حمزةَ لا يأتينا *** يَظَلُّ في البيت الذي يلينا
غضبانَ ألّا نلِد البنينا *** تالله ما ذاك في أيدينا
وإنّما نأخذ ما أعطينا *** نُنبتُ ما قد زرعوه فينا

Ku qosol Caqliga Alle-koodka:

Mid Alle-kood ah ayaa intuu maqlay, Allaah ayuun baa wax abuura, ayuu yidhi: Aniguba waxbaan abuuraa!! Markaas ayaa lagu yidhi: Bal na tus waxa aad abuurto? Markaas ayuu soo qaadday Cad qaydhin, God ayuuna u qoday oo ku riday, waxa uuna ku yidhi: Saddex Cisho dabadood ha inoo ahaato! Saddexdii Cisho markay soo wareegtay ayuu ka soo saaray Godkii, Cadkii oo uray, oo wada Dirxi noqday, markaas ayuu yidhi: waxaas oo makhluuq ah Aniga ayaa abuuray! Markaas ayaa lagu yidhi; Waayahay, Tiradoodu waa immisa? Markaas ayuu yidhi: Garan maayo! Markaas ayaa lagu yidhi; Ma wax aad abuurtay ayaanad tiradooda garanayn?!!
Markaas ayaa haddana lagu yidhi; Iska dhaaf Tirada oo Immisa ayaa Lab ah immisa-se ayaa Dheddig ah? Markaas ayuu yidhi: Garan maayo!
Markaas Ninkaasi Muqaalada ayuu samaynayay, waxan uu leeyahay waan abuurayna waa wax hore ugu sugnaa Hilibka, oo haddii Microscope lagu eeggi lahaa la arki lahaa, laakiin way koreen uun bas.

Awood ka sarraysa Banii-aadanka ayaa jirta:

Banii-aadanku waxa uu garanayaa awood ka sarraysaa in ay jirto, oo immika "Geeri" ayaa jirta, Geeridu waa shay Mushaahad ah oo la wada arkayo, Gaalo iyo Muslimiin waa la qirsan yahay, Gaaladu waxyaabaha Qaybiga ah ayay dafiraan, laakiin waxyaabaha Mushaahadka ah ee ay arkayaan ma dafiraan, Gaal kastaana wuu garanayaa in uu dhimanayo.
Markaas waa in la qiraa awood ka sarraysa makhluuqaatku in ay jirto, oo Allaah in uu jiro dilaya kuu doonno, kuu doonnana noolaynaya, iyaguna in ay yihiin Addoomadiisii.

Makhluuqaatku qaabkii ugu wacnayd ayay ku suggan yihiin:

Makhluuqaatka dhammaantood, waxa aad arkaysaa in sidii ugu wacnayd ilaahay u abuuray, Banii-aadanku waxa uu sameeyo lagama waayo nusqaan, waxyaabo badanna maba samayn karaan, oo awooddoodu may gaadhin, markaas waxa ay tusinaysaa taasi in Alle kaliya oo awood badan, cilmi badan uu abuuray.

Daliilka Tamaanuca loo yaqaanno:

Haddii Labo ilaah xattaa ay ka talin lahaayeen kawnkan, sidan habaysan muu noqdeen, ee is qabqabsi ayaa iman lahaa, Kii Roonoow Reerka u hadh ayaa ka dhici lahayd, xattaa haddii ay heshiis yihiin, mar uun in ay maamulka isku khilaafaan ayaa iman lahayd, oo tusaale ahaan mid uu doonno Ruux in uu Nafta ka qabto, ka kalena aanu doonnin, haddii xattaa aanay waligoodba is khilaafin taasi taagdarro ayay Muujin lahayd.

﴿مَا ٱتَّخَذَ ٱللَّهُ مِن وَلَدٍ وَمَا كَانَ مَعَهُۥ مِنْ إِلَٰهٍ ۚ إِذًا لَّذَهَبَ كُلُّ إِلَٰهٍۭ بِمَا خَلَقَ وَلَعَلَا بَعْضُهُمْ عَلَىٰ بَعْضٍ ۚ سُبْحَٰنَ ٱللَّهِ عَمَّا يَصِفُونَ ﴿٩١﴾﴾ [1]

Alle-koodku waxa ay ku duraan Mu'miniinta in ay "Qaybka" rumaynayaan! Waa sax oo way rumeeyaan Mu'miintu Qaybka, laakiin daliilo sharci ah iyaga oo cuskanaya ayay rumeeyaan Qaybka

﴿ٱلَّذِينَ يُؤْمِنُونَ بِٱلْغَيْبِ وَيُقِيمُونَ ٱلصَّلَوٰةَ وَمِمَّا رَزَقْنَٰهُمْ يُنفِقُونَ ﴿٣﴾﴾ [2]

Alle-koodku waxyaabo "Qayb" ah ayay rumeeyaan:

Alle-koodkuba Qaybka wax ka mid ah way rumeeyaan, iyaga oo aan wax xujjo ah u haysan, waxa ka mid ah Qaybkaa ay rumeeyaan, in ay rumaysan yihiin Qaar Alle-koodka ka mid ah in Banii-aadanku uu ka soo jeeddo Daanyeer!
Miyay arkeen Banii-aadankaa ay leeyihiin Daanyeer ayuu ka soo jeeddaa?
Jawaabtu waa May.

---

1 المؤمنون: ٩١
2 البقرة: ٣

Haddana way la yaabayaan Mu'miniinta rumaysan in Dadku ka soo jeeddaan Ciid, oo Aabbahood Aadan (عليه السلام) laga abuuray Camuud ama Ciid, oo Nabiyadii iyo Rusushii ilaahay ay inoo sheeggeen, Kutubtii ilaahay soo dajiyayna ku suggan, Haddii Banii-aadanka la baadhana Unugyada Dhulka waa laga helayaa Jidhkiisa, iyo Dhammaan Curiyayaashiisa.

Alle-koodku waa Ilma Daanyeer:

Waxa dhacday Qaar alle-koodka ka mid ah in ay ku faaneen in ay Dhashii Daanyeer yihiin, Mid Alle-kood ahaa oo Gabyaa ahaa, laguna magacaabi jiray (جميل الزّهاوي) ayaa waxa uu yidhi:

ما نحن إلّا أقْرَدٌ *** من نسل قردِ هالك
فخرَ لنا ارتقاؤنا *** في سُلَّم المدارِك

"Ma nihin moyaane Daanyeerro ka tafiirmay Daanyeer halaagsamay, Faan ayay noo tahay in aan marba darajooyin kor ugu kacayno aqoonta, oo annaga oo ahayn Dhal Daanyeer, haddana Dad aan nahay"!!
Mar kale waxa uu yidhi:

لا يغضبِ الناس من مقالِ *** قلتُ أصلُ الإنسانِ حيوان
فإنّ إنسانًا ابنَ قردِ *** أفضلُ من قردِ ابنِ إنسان!

"yaanay Dadku ka cadhoon hadalkayga aan idhi; dadku Xayawaan ama Daanyeer ayay ka soo jeeddaan, maxaa yeelay Qof Ina Daanyeer ah waxa uu ka fiican yahay Daanyeer ina Qof ah!!
Bal ka warran Qof Banii-aadan ah oo ilaahay Sharaf iyo karaamo siiyay, oo ku faanaya in uu yahay **INA DAANYEER.**
Hadda wixii ka dambeeya Alle-koodka lala doodayo ha lagu yidhaahdo; waar Ina Daanyeeroow!.

Markaa waxa ay rumaysan yihiin Arrimo badan oo Qayb ah, waxa ka mid ah sidoo kale qaybiyaatkaa ay rumaysan yihiin in ay leeyihiin; Caalamku waxa uu ka soo bilaabmay Dhibic yar oo Irbadda Caaradeeda oo kale leh, dabeetana wuu qarxay oo makhluuqaatkaas ayaa ka soo baxay ama ka dhashay.

Haddaan sidaadaba kuu raacno, Dhibicda markii hore yaa jirsiiyay? Yaa abuuray? Kama jawaabi karo Alle-koodku, Dhibicdu miyay iska jirtay? Mise iyada ayaa is jirsiisay?
Mar labaadka yaa qarxiyay? Ilayn Shay iskama qarxo isaga oo halkaas iska yaallee, immika Xabbad Camuud ah oo halkaas taalla miyay iska qarxi kartaa iyada oo aan sababi jirin? Waa maya.
Sidaas oo kale, Qaraxan ay leeyihiin intay Dhibicdaasi qaraxday ayuu Caalamkan dhan ee habaysani ka dhashay, Qaraxa ma habaysnaan, wanaag iyo dhismayaal ayaa ka samaysma, mise baaba' iyo habays la'aan? Immika Labadii qunbulo ee lagu qarxiyay Heroshiika iyo Najasaaki ma waxa ka dhashay Burbur, baaba' iyo kharaab, mise dhismayaal, habaysnaan iyo wanaag?

Qaraxan uu qarxayaa waa shay soo derriyay, wax kasta oo soo derriyana waxa ma hurtila ah in uu sabab yeesho.

Qaacido muhiim ah:

Waxa laga soo raraa Sheekh Weyn oo Culamadii Mutakallimiinta ka mid ahaa in uu yidhi: Baabka Ilaahiyaatka marka laga hadlayo, waxa aan bartay kaliya

"أنّ الممكن يفتقِرُ إلى مرجَّح"

"Shayga Mumkinka ah waa Makhluuqa'e[1] in uu u baahan yahay wax arjaxa"

---

1 Axkaamta caqliga ahi waa saddex:

1. الوجوب.
2. الإمكان.
3. الامتناع أو الاستحالة.

Markaa Allaah waa: واجب الوجود , oo jiritaankiisu waa mid waajib ah, jiritaan-la'aantiisuna waa mustaxiil. Makhluuqaatkuna waa ممكن الوجود oo in uu jiro iyo in aanu jirin labaduba waa mumkin, Jiritaankiisa ayaa ina tusinaya in aanu mustaxiil ahayn, in cadam uu ka horreeyayna waxa ay ina tusinaysaa in aanu waajib ahayn.

yacnii maadaama uu aqbalayo Makhluuqu Jiritaan iyo Jiritaan-la'aan, waa in la helaa wax jiritaankaas ka arjaxa jiritaan-la'aanta, kaa kala arjaxayana waa Khaaliqa oo Allaah ah.
Waxa uu hadalka ku sii daray oo uu yidhi; waxa kale oo aan ogaaday markii aan u sii fiirfiirsaday in mas'aladaa aan bartayna ay tahay waxba la'aan, Maxaa yeelay "Iftiqaar"-ku ama u baahashada wax loo baahdaa waa cadam, cadam-kuna shay maaha!!

Waddooyinka wax lagu garto Alle-koodka agtooda:

Alle-koodka qaar ka mid ah waxa ay ku koobayaan طرق المعرفة ama "Waddooyinka wax lagu garto" waxa lagu gaadho dareemayaasha ama xawaasta kaliya, oo waxa ay leeyihiin; waxa aan rumaynaynaa kaliya waxa aan aragno, ama maqalno, ama taabanno, ama urinno…
Sax maaha taasi, waxa jira waxyaabo badan oo la rumaysan yahay oo aan intaa midna lagu oggaan.

Dooddii Sumaniyada iyo Jahm binu Safwaan:

Waxa la soo raraa Qolo سمنيّة la odhan jiray oo Hindi ah, oo aan suggin waxa ay dareemayaasha ku suggaan mooyaane, in ay la kulmeen جهم بن صفوان Ninkii la odhan jiray ee lunsanaa, markaas ayay ku yidhaahdeen; Ilaaha aad sheeggayso, miyaad aragtay? Miyaad maqashay? Miyaad urisay? Miyaad dhadhamisay? Markaas ayuu yidhi: Maya! Maya! Maya!.
Waxa la yidhaahdaa; wuu shakiyay! Ilayn waa Nin lunsan'e, 40-Cisho ayaanu salaad tukan, dabeetana markii dambe ayuu fakaray oo isku yidhi; waar Nimanka maxaad iskaga celin weyday, oo ugu odhan weyday; Caqligiinna (Ruuxdiinna-na waa loo soo raraa) miyaad aragteen? Miyaad maqasheen? Miyaad uriseen? Miyaad dhadhamiseen?..

Markii uu la kulmay ayuu sidii u weydiiyay, markaas ayay yidhaahdeen; Maya! Maya! Maya!, markaas ayuu ku yidhi; haddaba caqli ma lihidin, ama Ruux ma lihidin!
Markaas ayuu bilaabay salaaddii 40-Cisho dabadeed oo salaad la'aan ah! Sida qisadaasi sheeggayso.

Waxyaabo la rumaysan yahay, Dareemayaashana aan lagu oggaan:

Waxyaabaha la rumaysan yahay ee haddana aan Dareemayaasha lagu oggaan waxa ka mid ah: Nafta ama Ruuxda

﴿وَيَسۡـَٔلُونَكَ عَنِ ٱلرُّوحِۖ قُلِ ٱلرُّوحُ مِنۡ أَمۡرِ رَبِّي وَمَآ أُوتِيتُم مِّنَ ٱلۡعِلۡمِ إِلَّا قَلِيلٗا ٨٥﴾ [1]

Shiikha la yidhaahdo مرعي الكرمي ee Culamada Xanaabilada ka mid ah, kitaab uu leeyahay oo Sifaatka ku saabsan waxa uu ku odhanayaa; Qeexista الروح waxa ku suggan 1000 Qawl!!

Tafsiirka "Ruuxda" waxa ku suggan 1800 oo qawl:

Shawkaani ayaa ka sii badiyay, oo waxa uu ku odhanayaa Aayadda tafsiirkeeda; 1800 oo Qawl ayaa ku suggan!!
Qeexitaannadaa badani waxa ay sheeggaysaa sida loogu wareeray Qeexisteeda, ee loo garan waayay.
Iyada oo Ruuxdii ama Naftii raadadkeedii la arkayo, haddana xaqiiqadeeda la garan maayo.
Waxa laga yaabbaa, Mid Alle-kood ah in uu yidhaahdo; Ruuxda waanigan ku dhaqdhaqaaqaya ee ku soconaya, raadadkeediina arkaya, ilaahayna sidaas oo kale maaha, waxa la odhanayaa; Allaahba Raadadkii awooddiisa iyo kelinimadiisa

1 الإسراء: ٨٥

waa la arkaa, oo makhluuqaatkan oo dhan waa raadadkii awooddiisa iyo kelinimadiisa, meel aad uga saartana ma jirto.

Caqligu Maskaxda maaha:

Sidaas oo kale waxyaabaha aan dareemayaasha lagu haleelin haddana la rumaysan yahay waxa ka mid ah: Caqliga, Caqliga cid aragtay ma jirto, haddana waa la rumaysan yahay, waxa laga yaabaa Alle-koodku in uu yidhaahdo; Caqligu waa Maskaxda! Waxa lagu odhanayaa; Adigu miyaad aragtay Maskaxdaada? May'e Mid ila mid ah ayay Cid kale aragtay, de haaye Adigu taada miyaad aragtay? Ilayn waad rumaysan tahay in aad Maskax leedahay'e, kama jawaabi karo.
Ta kale, yaa ku yidhi; Caqligu waa Makaxda, Caqliga iyo Maskaxdu way kala duwan yihiin, Xayawaanaatka -Banii-aadanka- waxa aan ka ahayn Maskax ayay leeyihiin, se Caqli ma laha, waana waxa uu Banii-aadanku kaga duwanaaday Xayawaanaatka kale.
Markaa rumaynta la rumaynayo iyada oo aan la arkayn Ruuxdii iyo Caqligiiba, waxa ay muujinaysaa rumayntu in aanay ku koobnayn Dareemayaasha wixii lagu garto.

Cuf-sijiidadka & Maayadda Laydhka:

Waxa ka mid ah waxyaabaha la rumaynayo iyada oo aan Dareemayaasha lagu gaadhin ama lagu oggaan, Cuf-isjiidadka ama الجاذبيّة oo wax kasta oo kor loo tuuro, Dhulka ayuu dib ugu soo noqonayaa oo soo jiidanaya, taasi waxa ay ina tusaysaa Cuf-isjiidadka Dhulka ku suggan, sida oo kale Birlabtu wax kasta oo Bir ah way soo jiidataa, markaa Cuf-isjiidadkaa waxa aynnu aragnaa uun raadkiisa ee ma aragno Laftiisa.
Waxa kale oo ka mid ah waxyaabaha aanan arag haddana rumaysannahay, Maayadda Laydhka, Maayaddaa Laydhka lafteeda ma aragno, hase ahaatee waxa aan aragnaa Iftiinkeeda iyo wax inay qabsanayso.

Soo duuduub oo waxa jira wayaallo badan oo aynnu rumaysannahay oo aan Dareemayaashana lagu haleelin ama lagu gaadhin.

Alle-koodka kale: Dareemayaasha & Caqliga ayaa wax lagu gartaa:

Qaar kale oo ka mid ah Alle-koodka ayaa ku daray Dareemayaasha Caqliga, oo yidhi; Waddooyinka wax lagu garto ama lagu ogaaddo waa: Dareemayaasha iyo Caqliga. Taas lafteedu sax maaha, oo Caqligu wax walba kama jawaabi karo,

Imaamu Shaafici (Ahun) waxa uu yidhi:

"إنّ للعقل حدًّا محدودًا، كما أنّ للبصر حدًّا محدودا"

“Caqliga waxa u sugnaadday Xad aanu ka tallaabi karin oo ka gudbi karin, sida Aragguba uu u leeyahay xad aanu ka gudbi karin”

Hadalkaas oo kale ayaa laga soo weriyay Saxaabigii weynaa ee Ibnu Cabbaas (Rc), oo waxa Nin uu u keennay Wiil, dabeetana waxa uu ku yidhi: Wiilkan tashuush ayaa kaga furan Qadarka Alle’e, bal la hadal oo u caqli celi, Ibnu Cabbaas (Rc) waxa uu ku yidhi: ‘Inankii walaalkayoow! Maxaad aragtaa? Markaas ayuu yidhi Wiilkii: Qof, Markaas ayuu ku yidhi: ‘Qofkaas dabadii maxaad aragtaa? Markaas ayuu yidhi Wiilkii: Waxba, Qofkaas ayaa igaga gudboon! Markaas ayuu Ibnu Cabbaas ku yidhi: "sidaa Aragga Indhuhu u xaddidan yahay, ayuu aragga Qalbiguna u xaddidan yahay”

Araggu waa Dareemayasha ka ugu xoogga badan:

araggu masaafo kooban ayuu wax ka arki karaa, isaga oo ah waliba Dareemayaasha ka ugu xoogga badan, haddana masaafo gaar ah oo kooban ayuu wax ka arki karaa, waliba waxaas uu arkayo-na mar walba run kama sheegayo, ee mararka qaarkood ayuu sidii xaqiiqadu ahayd si aan ahayn wax kuu tusinayaa.

Araggu mararka qaar waa gafaa:

Immika Ruuxu haddii uu Goor Gadiid ah marayo Laami ama Waddo waxa araggiisu uu tusinayaa Biyo, waa Dhalanteed ama Dhaan dabagaalle, marka uu meeshii ka fogaydna soo gaadho, waaba meeshii oo qallalan! Xattaa ma qoyana, Biyo in ay ku jiraan iska daaye.

﴿ كَسَرَابِۭ بِقِيعَةٖ يَحۡسَبُهُ ٱلظَّمۡـَٔانُ مَآءً حَتَّىٰٓ إِذَا جَآءَهُۥ لَمۡ يَجِدۡهُ شَيۡـٔٗا وَوَجَدَ ٱللَّهَ عِندَهُۥ فَوَفَّىٰهُ حِسَابَهُۥۗ ٣٩ ﴾ [1]

Sidaas oo kale Araggu marar kale ayuu qalad sheeggaa, waxana ka mid ah: Haddii aad soo qaaddo Madiibad, Biyo-na ku shubto, dabeetana aad ku riddo Qori toosan oo mudh ah ama Qalin toosan, waxa Indhahaaggu ay ku tusinayaan in Qalinka ama Qoriggu ka jaban yahay, halka Qalinkaas ama Qorigaas uu ka galay Biyaha ama kaga jiro , waa araggii oo qaldamay oo qalad ku tusiyay.

Sidaas oo kale mararka qaarkood wax weyn ayuu araggu kuu tusinayaa in uu yar yahay, sida Qorraxda oo kale, Qorraxda marka aad eegto waxa ay kuula muuqanaysaa wax yar! Waa foggaanta ay kaa fog tahay.
Haddii Araggii oo ah Dareemayaasha kii ugu xeeldheeraa uu sidaa u kooban yahay, maxaad ka filaysaa Maqalkii, Taabashadii, Urintii iyo Dhadhamintiinna?

Sidaa Dareemayaashu u xaddidan yihiin, ayuu Caqliguna u xaddidan yahay, oo aanu wax walba uga jawaabi karin, Tusaale ahaan: Ruuxdii wax ay tahay ma garanayo Caqligu, sidaas oo kale guryahan innaga sii jeedda waxa lagu falayo ma garan karo Caqligu, mana ogga, Arrimaha qaybiga ah oo dhan mid uu garan karo kana jawaabi karo maaha, markaa in Caqligaa garan-waayaya, marna garanaya, mar asiibaya saxdii, marna qaldaya wax lagu miisaamaa sax maaha.

1 النور: ٣٩

Caqliyadii way is khilaafayaan, wayna kala duwan yihiin:

Dadka qaarkood waxyaabaha qaarkood, caqligoodu waxa uu ka dhigayaa wax mustaxiil ah oo aan suuraggal ahayn, halka Dad kale caqligoodu uu suuraggal ka dhigayo, Tusaale ahaan: Jahmiyada, Muctasilada iyo Ashaaciradu way ku kala duwan yihiin Baabka Magacyada iyo Tilmaamaha ilaahay, oo Jahmiyadu waxa ay leeyihiin; Ilaahay Magacyo dhowr ah looma suggi karo iyo sifooyin, halka Muctasiladu ay leeyihiin; Ilaahay Magacyo dhowr ah Caqligu wuu u sugayaa laakiin tilmaamo uma sugayo, Ashaaciradu iyagu waxa ay leeyihiin; Ilaahay Magacyo badan wuu u sugayaa Caqligu, Tilmaamo dhowr ah oo 7 ah ama ka badanna Caqligu ilaahay wuu u sugayaa.

Waa maxay Waddooyinka wax lagu gartaa?

Haddaba waa maxay Waddooyinka wax lagu ogaaddaa, ama طرق العلم?
Waxa weeye:

1. Dareemayaasha.
2. Caqliga
3. Warka Runta ah ama الخبر الصادق, waxana soo galaya Waxyiga, oo ah Warka ilaahay سبحانه وتعالى iyo warka Rasuulkiisa عليه الصّلاة والسّلام, Waxiyigaasina waa mid macsuum ah oo aan gafayn, sida Caqligu u gafo, oo Dareemayaashu ay u gafaan.

﴿أَلَا يَعۡلَمُ مَنۡ خَلَقَ وَهُوَ ٱللَّطِيفُ ٱلۡخَبِيرُ ١٤﴾ [1]

﴿ءَأَنتُمۡ أَعۡلَمُ أَمِ ٱللَّهُۗ ١٤٠﴾ [2]

Markaas in warkaa runta ah la rumeeyaa waa lagama maarmaan, haddii uu Mid Alle-kood ah yidhaahdo; Anigu rumayn maayo Warka runta ah, kaliya waxa aan rumaynayaa waxa aan ku garto Dareemayaasha, ama uu i tusiyo caligaygu!

1 الملك: ١٤
2 البقرة: ١٤٠

Alle-koodku Warar badan ayay rumeeyaan:

Waxa lagu odhanayaa; Been ha sheeggin waxyaallo badan oo aanad dareemayaashana ku gaadhin, Caligaaguna aanu ku tusin ayaad rumaysan tahay, waxa ka mid ah, markan uu leeyahay; Dadku Daanyeer ayay ka soo jeeddaan! Muxuu ku suggay in ay Daanyeer ka yimaaddeen Dadku, waa War loo soo weriyay oo Been iyo Khuraafaat waliba ah.
Sidaas oo kale markan ay leeyihiin Alle-koodku; Caalamkani markii hore waxa uu ahaa Dhibic, markaas ayay qaraxday dhibicdii uuna ka yimi Makhluuqaatkaa dhan ee aad arkayso.
Markaa maxay ku suggeen arrintaa? waa War ay Alle-koodku uga warrameen, markaa ma Hawadiisa markuu waafaqo Warku ayuu qaadanayaa, markuu ka hor yimaaddo Hawadiisana waa beensanayaa?!
Ma marka ay Warka soo gaadhsiiyaan una sheeggAan Alle-koodku ayuu rumaysanayaa, marka Nabiyada ilaahay u sheeggaanna wuu beensanayaa, waxana uu odhanayaa; Qayb ayay rumaynayaan?!!

Xattaa marka ay leeyihiin, Hooyaday iyo Aabbahay ayaa na abuuray? Maxay ku suggeen arrintaa? Waa Khabar sawmaaha, Hooyo ayaa ii sheegtay ama Cid kale ayaa ii sheegtay.
Markaa in ay yidhaahdaan; Khabar annagu waxba kuma sugno sax maaha, arrimo badan oo ay Khabar ku sugeen ayay rumaysan yihiin.
Markaa Wararkii runta ahaa, ee yaqiiniga ahaa, Dalaa'ishuna ku tusisay waa beeninayaan! Kuwo Mala-awaal ah oo Gaal hebel sheeggay, marar badanna beenowdayna waa rumaysanayaan!

Wajiyada ka suuraggalka ah Makhluuqaatka abuuristooda:

Haddaan u nimaadno Makhluuqaatka yaa abuuray?
Jawaabtu waxa ay noqonaysaa, Allaah ayaa abuuray.
Sabri iyo Taqsiim[1] haddaan ku samaynno yaa abuuuray Makhluuqaatka, waxa aan odhanaynaa:

1. Makhluuqaatku waligood way jireen.
2. Maya, ee way soo derriyeen.

Marka hore labadaas ayaan u qaybinaynaa.
Wajiga hore in aanu sax ahayn waxa burinaya Daliillada Caqliga ah, kuwa Cilmiga ah iyo kuwa sharciga ahba. Markaas wajiggaa hore sidaas ayuu ku burayaa, buritaankiisuna u cad yahay.

Wajiga labaad ee ah way soo derriyeen ayaa hadhay, kaasna afar waji ayaa ka suuraggal ah marka Sabri iyo Taqsiim la mariyo:

1. Iyaga ayaa isasoo derrisiiyay, oo shay walba isaga ayaa is abuuray.
2. Ama qaarkii ayaa qaarka kale abuuray.
3. Ama Khaaliq ayaa abuuray.
4. Ama way iska abuurmeen.

Waa afar waji.
In la yidhaahdo, shaygu isaga ayaa Is jirsiiyay suuraggal maaha, oo inta aanu is jirsiin ma jirin oo cadam ayuu ahaa, markaa side ayuu isku jirsiinayaa?
Cadamkuna waxba ma jirsiiyo

العدمٌ لا يُوجدُ شيئًا.

In la yidhaahdo; markii horeba isaga oo jira ayuu is jirsiiyayna suuraggal maaha oo waa تحصيل الحاصل.

Wajigga Labaadna suuraggal maaha, oo in la yidhaahdo; Makhluuqaatka qaarkood ayaa qaarka kale abuuray, oo Qorraxdu iyada ayaa Dayaxa abuurtay,

[1] Sabri iyo Taqsiim: waxa weeye mas'alada in wajiyada ka suuraggalka ah oo dhan la sheego, dabeetana la buriyo oo la bushiyo wixii aan sax ka ahayn, wajiga kaliya ee saxda ahna la suggo oo la baaqiyeello.

ama Insaanku isaga ayaa Xoolaha abuuray waa baadil, makhluuqu horta wax Nool ma samayn karaba, wixii aan noolaynna Cadam wax kama jirsiin karo, laakiin waxa uu sameeyaa in uu shay siduu ahaa ka beddelo oo si kale ka dhiggo, immika marka uu miis samaynayo, Qoriga ayuu ka soo jarayaa Geedka markaas Mishiin iyo wax inta la galiyo ayuu u beddelayaa Miis, waxyaallaha kale ee uu sameeyaana waa sidaas oo kale uun.

Dabeecaddu waa maxay? Miyay wax abuuri kartaa?

Qaar kale ayaa si kale u dhiggay, markaas ayay yidhaahdeen; Dabeecadda ayaa abuurtay!. Dabeecaddu waa maxay? Ma shayga Daatadiisaa (Laftiisaa) mise waa tilmaamihiisa? Haddii la yidhaahdo; waa laftiisa, Shaygu isaga oo cadam ah sidee wax u jirsiin karaa, ilayn cadamku shay maaha'e, haddii la yidhaahdo; maya ee waa tilmaamahiisa, Tilmaamaha shayga waxa la helaa oo ay yimaaddaan marka isagii la helo, Tilmaamo ka horraynaya shaygii ma jiraan.

Qawaaniin & Xeerar wax abuuraa ma jiraan:

Qaar kale ayaa si kale u dhiggay oo yidhi; waxa jira kawnkan Qawaaniin iyo Xeerar ka shaqaysa, markaa Qawaaniintaa ayaa abuurtay ama jirsiisay Makhluuqaatka!!
Waxa lagu bushiyay oo lagu yidhi; Qawaaniintaa yaa qawaaniin ka dhiggay.
Waa iska hadal meel waayay waxaa ay leeyihiin Qawaaniin ayaa wax samaysay.

Indha-adkaanta & Madax adayga Alle-koodka:

Nimankan Alle-koodka ah Niman ka indho-adag ma jiraan! Mid ka mid ah ayaa waxa uu xidhay Garan uu ku qoray: 2+2=5! Taasina waxa ay ka tahay Cinaad iyo madax adayg, maxaa yeelay Cuqalada oo dhan ayaa garanaysa 2+2 in ay tahay 4.

Xaalkooda Nimanku waxa weeye

"عنزٌ ولو طارت"

"Ri' weeye haba duushee" laba Nin ayaa waxa ay ku murmeen wax ka foggaa, midkood waxa uu yidhi; waa Ri', kii kalena waxa uu yidhi; waa Haad, markii dambe ayayba duushay, markaas ayuu yidhi kii lahaa waa Haad, waa taas oo waa Haad, waataa duushay'e, kii kale ayaa yidhi; Waar haba duushee waa Ri'!

﴿وَلَئِنْ أَتَيْتَ ٱلَّذِينَ أُوتُوا۟ ٱلْكِتَٰبَ بِكُلِّ ءَايَةٍ مَّا تَبِعُوا۟ قِبْلَتَكَ ۚ ﴿١٤٥﴾﴾ [1]

"haddii aad ula timaaddo Kuwa gaaloobay ee Ehlu kitaabka ah xujo kasta, ma raacayaan qibladaada, oo kuma rumaynayaan"

Qalbiga Alle-koodku waa Bakeeri foorara oo kale:

Waxa ay ka dhiggan yihiin Alle-koodku ayay Culamada qaarkood yidhaahdeen; Bakeeri foorara oo kale, haddii Bakeeri lagu foorariyo Caagad, dabeetana Booyado Biya ah dusha lagaga shubo, Bakeerigaa miyay wax Biyo ah gudihiisa galayaan? Waa maya, Biyihii hareeraha ayay ka dhaafayaan oo ka qubanayaan, waayo Biyuhuba in ay galaan uma diyaarsana, Alle-koodka qalbiyadoodu waa sidaas oo kale.

Xaalka Alle-koodka marka Geeridu ku soo xaadirto:

Waxa uun waaggu u baryaa Alle-koodka marka ay Geeridu ku soo xaadirto, qaar badan markaas ayay ogaadaan Xumaanta ay ku jiri jireen, Xaaladdaas ayayna doonnaan in ay Iimaan la yimaaddaan, Iimaankaasina waxba tarimaayo oo waa mid ka fursanwaa ah, ee mid doorashadooda ay ula imanayaan maaha

﴿وَلَيْسَتِ ٱلتَّوْبَةُ لِلَّذِينَ يَعْمَلُونَ ٱلسَّيِّـَٔاتِ حَتَّىٰٓ إِذَا حَضَرَ أَحَدَهُمُ ٱلْمَوْتُ قَالَ إِنِّى تُبْتُ ٱلْـَٰٔنَ وَلَا ٱلَّذِينَ يَمُوتُونَ وَهُمْ كُفَّارٌ ۚ أُو۟لَٰٓئِكَ أَعْتَدْنَا لَهُمْ عَذَابًا أَلِيمًا ﴿١٨﴾﴾ [2]

1 البقرة: ١٤٥
2 النساء: ١٨

Nabiguna (ANKH) waxa uu yidhi:

"إنّ الله يقبَل توبة العبد ما لم يُغَرْغِرْ"

“Allaah waa aqbaa tawbadda Addoonkiisa inta aanay Naftu Dhuunta soo gaadhin”

Waa maxay العلل الأربعة**?**

Culamada qaarkood waxa ay yidhaahdaan; waxa jira wax la yidhaahdo

العِلَل الأربعة

Cillooyinkaa afarta ah waxa weeye:
Wax kasta oo la sameeyay, waa in ay jirtaa:

1. Cid samaysay waa in ay jirtaa.
2. Waxa laga sameeyayna waa in ay jirtaa.
3. Si loo sameeyayna waa in ay jirtaa.
4. Ujeeddo loo sameeyayna waa in ay jirtaa.

1. مَن فعل؟
2. ممّ فعل؟
3. كيف فعل؟
4. لمَ فعل؟

Saynisyahannadu, Laba su’aalood oo ka mid ah afartaas ayay ka jawaabaan, labana kama jawaabaan, waxa ay ka jawaabaan ta labaad iyo ta saddexaad, su’aasha ugu horraysa oo masnuuc kasta ama shay kasta oo la sameeyay ka imanaysana ma ka jawaabaan.
Immika haddii Cunto laguu keenno karsan, waxa aad odhanaysaa oo su’aasha ka bilaabaysaa

من طَبَخ الطَّعامَ؟

“Yaa kariyay Cuntada?”

Dabeetana jawaabtu waxa ay noqonaysaa

فلانٌ الطّبّاخُ.

“Hebelkii Kuugga ahaa”

Ka warran haddii la yidhaahdo

ومن طبخ الطّبّاخ؟!

“oo Kuuggana yaa kariyay?”!
Sax ma noqonaysaa? Maya weeye, maxaa yeelay

الطّبّاخُ ما يُطبخ

“Kuugga lama kariyo”!
Sidaas oo kale ayaanay sax u noqonayn in la yidhaahdo

ومن خلق الخالق؟

“Yaa abuuray Khaaliqa?” yacnii garannay in Makhluuqaatka Allaah uu abuuray’e, Allaahna yaa abuuray.

Waayo su’aasha lafteeda ayaa iska hor imanaysa, Waana khaaliq waana makhluuq, waa wax aan soconayn, Qaacidada Caqliyada ahna wax ay tidhaahdaa النّقيضانِ لا يجتمعانِ ولا يَرتفعانِ.
“Labada shay ee isku liddiga ah ma kulmaan, mana wada maqnaadaan” waa sida Khaaliqa iyo Makhluuqa, Geerida iyo Nolosha.

Aan ku noqonno wajiyadii ka suuraggalka ahaa Makhluuqaatka, waxa aan soo bushinnay labadii waji ee hore, oo ahaa in aan shay walba isagu is abuurin, makhluuqaatka badhkoodna badhka kale abuurin.
Wajiga saddexaad waxa weeye, in ay iska abuurmeen oo sudfah ay ku yimaaddeen, Wajiganina waa waji aan suuraggal ahayn, oo shay cadam ah oo aan jirin iyada oo aan cidi jirsiin in uu iska jiraa waa mustaxiil, maxaa yeelay shayga cadamka ah ee aan jirin waxa lagama maarmaan ah in cid jirsiisa la helo.
Tusaale: Guri Fiilla ah oo qurux badan, oo Beer leh ayaad aragtay, markaas ayaad cid weydiisay; Yaa sameeyay Gurigan quruxda badan? Masuu ku yidhi; Cidina may samayn, ee Habeen ayuun baa la seexday, markaas ayaa lagu soo toosay isaga oo sidaas ah!! Ma rumaysanaysaa? Waa maya, waa wax aan caqliga galayn.

Markaa wajiyadii afarta ahaa markay saddexdaasi burtay, waxa soo hadhay kaliya in la yidhaahdo; Allaah ayaa abuuray Makhluuqaatka oo dhan, isaga ayuun baa Khaaliq ah, wixii ka soo hadhayna waa Makhluuq.

Alle-koodku waa laba qaybood:

Alle-koodku waxa ay u qaybsamaan Laba qaybood:

1. الإلحاد الإيجابي.
2. الإلحاد السّلبي.

Nooca hore, waa Alle-kood isagu leh; waxa aan ogahay in aan Allaah jirin oo khaaliq jirin.
Nooca labaad, waxa weeye Alle-kood leh; Anigu garan maayo Allaah ama Khaaliq in uu jiro iyo in aanu jirin, ama waan ka shakisanahay in uu Khaaliq jiro. Labada noocba waa gaalo.

Qaabka loola doodayo Mulxidka Salbiga ah:

Noocan labaad ee salbiga ah, haddii uu doono in uu kula dodo kaga horree Adigu weerarka, hana suggin in uu ku yidhaahdo; Anigu Jiritaanka Allaah waan ka shakisanahay'e Adigu ii sug, waxa aad ku tidhaahdaa; Shakigu waa aqoon-darro ee sidee markaa aad ula doodi Qof cilmi leh.
Tusaale: haddii Qof aan cilmiga dhakhtarnimada waxba ka aqoon, uu yidhaahdo; Dhakhaatiireey! Isu kaalaya waan idin la doodayaaye, sax miyay noqonaysaa? Dhakhaatiirtaasi inay maqlaan oo la doodaanna ka warran?!

Kaasi waa Alle-koodkii salbiga ahaa, isaga dooddiisu way fududdahay oo waxa aad odhanaysaa; orod wax soo baro, shaki cilmi maaha'e.

Qaabka loola doodayo Mulxidka Iijaabiga ah:

Alle-koodka iijaabiga ah, marka uu ku yidhaahdo; Anigu waxa aan ogahay in aan Allaah jirin, waxa aad markiiba weydiinaysaa; Maxaad ku sugtay in aanu Allaah jirin, Caddayntii ayaa lagaa rabaa

البيّنة على المدّعي

"Caddayntu waxa ay saaran tahay oo laga rabaa ka wax sheeganaya"

والدّعاوى إن لم تقيموا عليها بيّناتِ أصحابُها أدعياءُ.

Haddii uu yidhaahdo; maan arag!
Oo wax kasta oo aanad arag ma jiraan miyaa?
Caqligaagga maad arag, Ruuxdaada maad arag.
Haddii immika Qof yidhaahdo; Anigu ma arkin Bisha, markaas may dhalan! Sax miyay noqonaysaa? Waa maya, haddii aanad Adigu arkin Dad kale ayaa arkay ayaa la odhanayaa

إذا لم ترَ الهلالَ فسلّم *** لأناسٍ رأوه بالأبصار

Haddii uu yidhaahdo; Caqligaygu ima tusin!
oo wax kasta oo aan caqligaagu ku tusin ma jiro miyaa?
Haddii uu yidhaahdo; Anigu wax daliil ah uma oggi oo uma garanayo Jiritaanka Khaaliqa!
waxa la odhanayaa; Adigu in aanad oggayn miyay la macna tahay in aanay wax daliilla ah lahayn, ilayn ogaalkaaga ayuun baad diidday'e, Qaacidada Caqligu ina tusiyay waxa ay sheegaysaa

"عدمُ العلمِ بالشّيء ليس علمًا بالعدم"

"ogaal-la'aanta Shaygu kama dhigna ogaal la ogyahay jiritaan-la'aantiisa"
Immika Masaa'il farabadan oo aanad garanayn ayaa jirta, macnaheedu ma ma jirtaa? Waa maya.

Waxana habboon in la adeegsado marka Alle-koodka lala doodayo Ereyada الخالق والمخلوق، الحادث أو المحدَث والمحدِث.

Gaaladu aad ayay u faafiyaan Alle-koodka:

Gaaladuna aad ayay u faafisaa Alle-koodka, immika Dalalka Gaalada, Dadkii dambe oo dhan waxa ay noqdeen Alle-kood, Fikradii Darwin-na agtooda muqaddas ayay ka tahay aan laga hadli Karin, iyada oo la ogyahay Darwin laftiisu -sida kutubtiisa qaar uu ku sheeggay- in uu ka shakisan oo aanu toos ugu qanacsanayn.
Waxa ayna ku dadaalayaan Gaaladu sida ay u lumeen in ay Dadka oo dhanna u lumaan oo u gaaloobaan

﴿وَدُّواْ لَوۡ تَكۡفُرُونَ كَمَا كَفَرُواْ فَتَكُونُونَ سَوَآءٗ ٨٩﴾ [1]

Cismaan Binu Caffaan (Rc) waxa laga soo weriyay in uu yidhi:
"ودّت الزّانية لو زَنَتِ النّساء كلّهنّ"
“Waxa ay jeclaysatay saaniyaddu (Gabadha Sinaysataa) in Dumarka oo dhan ay sinaystaan”
Marka hore waxa ay Gaaladu Qofka ku soo jiidanayaan Alle-koodnimo ayaan ku baraynaa, hadhowna waxa ay ka dhigayaan Qaniis.

Alle-koodka & Akhlaaqdii:

Alle-koodku akhlaaqda way ka dhinteen, oo wax akhlaaq ah oo u dhowran ma jirto, Mid ka mid ah Alle-koodka ayaa la weydiiyay; in loo galmoodo Maxaarimta (Hooyada, Inanta, Eeddada, Habaryarta), markaas ayuu yidhi: wax diidaya ama wax wax xun ka dhigaya ma jiro, laakiin caafimaad ahaan ayaanay fiicnayn!

1 النساء: ٨٩

Talo & Gunaanad:

Waxa habboon in aan si muuqata loola dooddin Alle-koodka, Maxaa yeelay taasi waxa ay dhibaato ku tahay Dadka aan aqoonta lahayn, sidaas oo kale waxa aan ku talinayaa in aan la galin mawaaqicdooda Baraha Bulshada ay ku leeyihiin, Shubuhaatkoodana la dhegaysan, waana in laga cararo oo aan loo dhowaan, Maxaa yeellay de xanuun darran oo diinta kaga suggan ayay qabaan, Qof immika Xanuun darran qaba saw laga durki maayo

"فرّ من المجذوم فرارَك من الأسد"[1]

Immika Qof haddii uu haysto Dheeman ama Dahab, meeshana Shufto joogto, ma waxa la gudboon in uu aad iskaga ilaaliyo oo ka fogaaddo Shuftadaas, mise in uu doonto ayaa habboon oo Goobahooda ugu taggo?
Diintu ka qaalisan Dheeman kasta iyo Luul kasta.

Dhammaad.

1 رواه أحمد (9720) من حديث أبي هريرة، وصححه شعيب الأرنؤوط في تحقيق المسند، وقد رواه البخاري في صحيحه معلقا.